
*jamhuuriyadda diimoqraadiga soomaaliya*

*wasaaradda waxbarashada*

# BUUGGA JUQRAAFIGA

## DUGSIYADA HOOSE



...... ay dhigeen: **GUDDIGA AFKA SOOMAALIDA**

**Mugdisho, 1971**

PJ
A2
1971

RSCH.
HFK 3913



**Jaalle Maj. General** MAXAMMED SIYAAD BARRE

MADAXWAYNAHA

GUDDIGA GOLAHA SARE EE TAWRADDA

# BUUGGA JUQRAAFIGA

## Fasalka Saddexaad

## SOOMAALIWEYN: DAD IYO DAL

### DALKA SOOMAALIYEED

Soomaaliya waa dal ka mid ah Afrikada Bari, kuna yaalla geeska Afrika. Soomaaliya waxaa dhex mara xarriiqda dhulka kala barta. Waxayna martaa xarriiqdaasi meel magaalada Jamaama u dhow oo la yiraahdo " Sunguuni".

Soomaaliya geesta Bari waxa ka xiga, Badweynta Hindiya, Galbeedna waxa ka xiga dalka Itoobiya, Koonfurna waxa ka xiga dalka Kiiniya, Waqooyina Badyarada Cadmeed. Dalka Jamhuuriyadda Diimuqraaddiga Soomaaliya tooxdiisa waxa lagu qiyaasay 683,000 kiiloomitir oo isku wareeg ah.

Dalka Soomaaliweyn wuxuu ka koobmaa Jamhuuriyadda Diimuqraaddiga Soomaaliya, Xeebta Soomaliya ee Faransiisku guumaysto, Soomaalida Galbeed ee Itoobiya guumaysato, iyo NFD oo Kiiniya guumaysato. Sidaad ogtihiin calanka Soomaalidu wuxuu leeyahay xiddig shan gees leh, oo gees walba ka joogo shantii qaybood ee dalka Soomaalida guumaystayaal ku u qaybiyeen.

## GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Dalka Jamhuuriyadda Diimuqraaddiga Soomaaliya wuxuu u qaybsamaa siddeed Gobol:

1. Gobolka Waqooyi Galbeed, waxaana magaalo-madax u ah Hargaysa.
2. Gobolka Boosaaso, waxaana magaalo-madax u ah Boosaaso.
3. Gobolka Waqooyi Bari, waxaana magaalo-madax u ah Burco.
4. Gobolka Mudug, waxaana magaalo-madax u ah Gaalkacayo.
5. Gobolka Hiiraan, waxaana magaalo-madax u ah Beledweyne.
6. Gobolka Banaadir, waxaana magaalo-madax u ah Xamar oo xaruntii Jamhuriyadda ah.
7. Gobolka Jubbada Sare, waxaana magaalo-madax u ah Baydhobo.
8. Gobolka Jubbada Hoose, waxaana magallo-madax u ah Kismaayo.

Siddeeda Gobolna waxay u sii qaybsamaan 48 degmo.

DAWLADDA TAWRADDA

Waagii hore waxaa waddanka u talinjiray dawlado dibi-socod ah oo ka dhisan Baalamaan iyo Jamciyado. Dawladahaasu waxay ka soo bixi waayeen xilkii dalka ka saarnaa waxaana xumaaday maamulkii oo waxaa batay baahidii, qolaqoladii iyo musuqmaasuqii. Shisheeyihii iyo cadawgii waddanhuna waqti buu halay uu sameeyo wuxuu doono.

Dabadeed dhibaatadaas iyado lagu jiro ayaa Abishii Oktoobar 21,1969, ciidamada qalabka sidaa tawrad dhaliyee, oo la wareegeen xukunkii dalka. Isla waqtigiina waxaa la bala'eryay Barlamaankii oo waxa la baali'iyay Jimciyadihii. Dadweynihii Soomaaliduna si wanaagsan buu u taageeray oo isu garab taagay tawradda. Kolkaas waxa la sameeyay dawlad ka dhisan laba gole:

1. Guddiga Golaha Sare ee Tawradda, oo uu guddoonshe ka yahay Jaale Janaral Maxamad Siyaad Barre.
2. Golaha Segreteriyaalka, oo uu guddoonshe ka yahay Jaale Janaral Maxamad Siyaad Barre.

Dawladdu waxay leedahay Wasaarado badan oo Segreteriyaalku hawlaheeda maamulaan. Waxaana ka mid ah, Wasaarada Waxbarashada, Caafimaadka? Beeraha, Gaashaandhigga, Gudaha, Dibadda, lacagta, Garsoorka iyo kuwa kale oo badan. Waxaa kaloo dalku leeyahay saddex ciidan oo qabta hawlo kala jaad ah:

1. Ciidanka Xoogga oo dalka cadawga ka ilaaliya, ama dibad ha kaga yimaaddo ama gudihiisaba ha ka dhasee,
2. Ciidanka Booliiska oo dhawra nabadgelyada iyo xeerka dalka.
3. Ciidanka Xabsi oo haya, waxna bara dadka jebiya xeerka iyo qawaaniinta dalka u taalla

DHULKA ABUURTIISA

Dalka Jamhuuriyadda Diimuqraadiga Soomaaliya guud ahaan wuxuu u kala baxaa afar qaybood:

1. Dhul xeeb ah oo aad u hooseeya oo badaha ku dhuw. Waxaana ku yaalla magaalooyinka Kismaayo, Xamar, Boosaaso, Berbera, Saylac iyo kuwa kale.

2. Dhul aad u sarreeya oo buura dhaadheer leh:
Buurahaas dhaadheerna waxa ka mid ah Surrad oo Ceerigabo ku dhow, Cal Miskaad iyo Cal Bari oo ku yaalla Gobalka Boosaaso.

3. Dhul ooga ah oo la yiraahdo Carro-Guduud waana dhul xooluhu ku dhaqmaan oo dhir badan leh.

4. Dhul ooga ah oo la yiraahdo Carro-Madow. Waana dhul beeraha ku wanaagsan. Waxaana ka mid ah inta labada Webi u dhexaysa, Banaadir iyo meelo kale.

LAYLI:

1. Dhulka Soomaalida abuurtiisu immisa bay u kala baxdaa?
2. Beeruhu dhulkee bay ka wanaagsan yihiin?
3. Dalka Soomaalidu muxuu ka koobanyahay?
4. Immisa waddan oo Soomaaliya baa weli ku hoos jira gacanta guumaysiga?
5. Immisa Gobol baa Jamhuuriyadda Diimuqraaddiga Soomaaliya u kala baxdaa?
6. Golaha Sare ee Tawradda yaa guddonshe ka ah?
7. Immisa ciidan baa waddanku leeyahay? Sheeg magacyadooda?
8. Qor magacyada shan wasaaradood.

# HAWADA

Dalka Soomaaliya afarta xilliba waa kulayl. Waxaana u sii kulul xeebaha. Kulaylkooduna marmar waxuu gaaraa 37°.

Waxaana u qabow dhulka sare ee buuraha leh. Qobowgooduna marmar wuxuu gaaraa 27°.

Sida badan dalka Soomaaliya waxa ka dhaca afar dabaylood oo afarta xilli la kala sodca.

Waxaana weeyaan:-

1. Dabay-Xagaa oo ka timaadda Galbeed, Xagaayiina dhacda. Dabayshaasu waxay leedahay kulayl iyo qallayl. Dabaylahana iyadaa ugu xoog badan.
2. Gudub: oo ka timaadda konfur, Gugiina dhacda. Waxayna keentaa kaliil iyo saadaal roob.
3. Musareen: ( Majiine ) oo ka timaadda Bari, Dayrtayna dhacda. waxayna keentaa dhaxan iyo qabow badan.
4. Daba-Hadow: oo ka timaadda Waqooyi, jiilaalkiina dhacda. Waxayna keentaa kulayl iyo qallayl.

## X I L L I Y A D A

Sannadka ( Guga ) Soomaaliya wuxuuu u qaybsamaa afar xilli. Waxaana u horreeya Guga oo ka bilowda Dabshidka. Afarta xilli mid walba waa saddex bilood. FUSHADE, GUSOORE, SAMUULAD.

Waxaa ku xiga Xagaa oo ka bolowda.DIRSAGAALO,LIXADHAQE,SAMALOHO... Roob la yiraahdo Karan baa ka da'a gobollada Waqooyi-Galbeed iyo Soomaalida Galbeed xeebaha Banaadir iyo Jubbada Hoore na waxaa ka da'a roob la yiraahdo Xagaayo.

Waxaa kaloo ku xiga Dayr oo ka bilaabata.KALAHAAN,.DAMBERSAMO,BALDAAQ. Dayrta waxaa da'a roob ka yar Guga. Waxayna leedahay dhaxan.

Waxaa u dambeeya Jiilaal oo ka bilowda.DIRAAGGOOD,.LIXKOR,.TODBOB. Jiilaalkii waxaa dhaca dabeyl engegan oo siigo wadata, Jiilaalkii roob ma da'a oo xoolaha waa la waraabiyaa. Dhaxantu gobollad qaarkood si wayn bey uga dhacdaa.

# IS DHEXGALKA DADKA

Soomaalidu waxay deggantahay geeska Afrikada Bari; waana dad si walba isugu mid ah: Xagga hiddaha, dhaqanka, midabka iyo xagga afka ba.

Badankiisuna waa reer guuraa xoolo dhaqato ah.

In kastoo dawlodihii shisheeyaha ahaa ee dhulka Soomaaliya guumaysan jiray soohdimo u kala sameeyeen, haddana dadka Soomaaliyeed wax kala seeraa ma jiro meel kasta oo doog leh ama biyo leh waa ay wada daaqaan oo wada cabbaan.

Reer guuraga Soomaalidu meeshii daaqu iyo biyuhu ku yaraadaan way ka guuraan waxayna tagaan meeshii daaq iyo biyo leh.

Waxa se wanaagsan inaan beeraha iyo xoolaha la soo cidlayn marka, dhibaatadoodu joogto.

## NOLOSHA DADKA SOOMAALIYEED

Dadka Soomaalidu wuxuu ku nool yahay xoolaha oo uu daqdo, beeraha oo uu fasho, kalluunka oo uu jillaabto iyo waxyaalo kale oo farsamdu ka mid tahay.

Xoolaha la daqdo waxaa ka mid ah geela, lo'da, ariga, fardaha iyo dameeraha. Waxaana dhaqda reer guuraaga. Beeraha la fashona waxa ka baxa waxaa ka mid ah meseggeda, galleyda, digirta, sarreenka, muuska, cambaha, liinta iyo sisinta oo saliidda laga sameeyo. Kalluunkana waxaa laga jillaabtaa xeebaha gobollada Waqooyi Bari, Boosaaso, Benaadir iyo Jubbada Hoose.

LAYLI GUUD ( Qaybtii Koobaad)

1. Hadalladan soo socda wax ka dhex:

a) Soomaaliiya Afrika xaggee kaga taallaa?

b) Xarriiqda dhulka bartaa xaggee bay dalkeenna ka martaa?

c) Dalkeenna xagga galbeed yaa ka xiga?

d) Afarta dabaylood ee dalkeenna ka dhaca magacaw?

e) Sheeg afarta dabaylood midiba xilligay dhacdo iyo xaggay ka timaaddo

2. Hadalladan soo socda meelaha bannaan buuxi:

a) Gugu Soomaali a wuxuu ka bilawdaa___________________.

b) Xagaagii roobka da'a waxa la yiraahdaa___________________.

c) _______________waxa lagu yaqaan cadceeddoo kululaata,_______________.

badan oo da'a iyo_______________ _______________.

d) Gugii xooluhu_____________iyo caanay noqdaan, waanay_________________.

e) Dayrtii waxa dhasha_____________beerta dhab wax u yeela.

3. Hadalladan soo socda ku hor qor "Run","Been" ama " ma aqaan".

a) Soomaalidu isku midab ma aha.

b) Beeraleydu hadday abaarsato, magaalooyinka u dhow bay tagaan.

c) Reer Guuraaga, beeraleyda iyo reer magaalkuba way isu tal-tallaabaan.

d) Gobollada dalkeenna Boosaasaa ugu dal badan, Banaadir baana ugu dad yar.

e) Xoolaha, kalluunka iyo beeruhu ba waxay ku noolyihiin dadka.

## QAYBTI LABAAD

## DHAQANKA SOOMAALIDA

## DHIISKA AQALLADA

Aqallada Soomaalidu dhisato waxaa ka mid ah:-

1. Aqal Soomaali: oo reer guuraagu dhista.
Wuxuuna ka kooban yahay ded iyo dadab oo ah raro caws ka samaysan, kebdo mayrax ka samaysan iyo saamo. Wuxuu kaloo ka kooban yahay udbo, xadhko iyo dhigo laba jaad ah. Waxaana loo dhisaa sida xabbad ukun ah oo la kala gooyay.

2. Mundul: oo ay dhistaan beeraleydu. Wuxuuna ka koobmaa qori dheer oo dhexda laga gesho, sarab hareeraha lagaga teedsho iyo dhoobo lagu nabo.

3. Cariish ama derged: oo ay dhistaan beeraleyda iyo reer magaaluhuba. Wuxuuna ka koobmaa qoryo, sarab, caws iyo dhoobo. Dushiisuna way kale rogan tahay.

4. Saro ama daaro: reer magaaluhu dhistaan.
Waxayna badanaa ka samaysan yihiin dhagax, dhoobo, nuurad iyo sibir, si qurux badanna waa lo dhisaa. Daaqado iyo albaabana, waa lo sameeyaa, saraha qaarkoodna waa la iska kor dhisaa.

## ALAABTA SAMAYNTEEDA

Soomaalidu alaabtay samaysato oo ay wax ku qabsato waxa ka mid ah:

1. Gudin: oo ah bir afleh oo qori gaar loh ku daabanyahay. Dhirta ayaana lagu jaraa.
2. Hangool: oo ah qori afna gar ku leh afna laba farraar ku leh, dhirta ayaa marna la iskaga riixaa markoona lagu soo jiitaa.
3. Yaambo(xagaaf): oo ka samaysan bir af leh oo qori ku daaban yahay. Beeraha ayaana lagu falaa.
4. Kawaawo: oo beeraha lagu kawaaweeyo, robballada qaarkoodna lagu qaybiyo.
5. Xammanta dibidu jiiddo: oo beeraha lagu faloo oo ay ka mid yihiin: Nugi, irfi, marashi, jiqirti, Digirro, Harqood iyo Milaagyo.
6. Kolay, Mingaaf iyo Jaffan: oo ah alaabta xijiga lagu gurto.

ADEEGGA GURIGA

Soomaalidu waxay leedahay alaab fara badan oo ay hawsha guriga ku qabsato. Alaabtaas oo dhanrsiyadaa samaysata. Waxaana ka mid ah:-

1. Alaabta Cuntada: oo ay ka mid yihiin dheriga iyo dhaal oo dhoobo ka samaysan, wxna lagu karsado. Xeero, Kille, qoobad(kubi) fandhaal, qarsin, qudde oo qori samaysan. Tib iyo mooyye oo qori ka samaysan badarkana lagu tumo, iyo Ridqin iyo wille(shiid) oo dhagax ka samaysan oo badarka lagu shiido.

2. Alaabta Cabbista: oo ay ka mid yihiin haan, dhiil, haruub, oo qabo ama qori ka samaysan. Sibraar oo biyaha ama Caanaha lagu shubto kana samaysan harag. Aashuun oo biyaha lagu shubto oo ka samaysan dhoobo, iyo kalax oo biyaha la daysado oo qori ka samaysan.

3. Gogosha Guriga: oo ay ka mid yihiin weylaalista, iyo saanta oo harag ka samaysan. Dermooyin iyo salliyo oo caws ka samaysan. Harrarro oo caws ka samaysan. Barshi(barki) oo la barkado oo qori ka samaysan.

## DHARKA DADKA

Dharka Soomaalidu xirato haddi loo cego Miyi iyo magaalabo, inyar buu ku kala duuwayahay. Dharka Soomaalida marka laga hadlaayo waxa loo jeeda dharkay hiddada u lahayd, amase dharkii ay xiranjiireen waagii hore.

Soomaalidu waxay u badan tahay reer guura iyo beeralay, iyagu na dharkay qaataan wuxu u badan yahay dhar cad oo loo yaqaan(laba go') laba goodle - iyo shanlay faraqsan oo raggu xirto.

Haweenkuna dharka ay xirtaan wuxu u badan yahay guntiino tarash leh oo gobollada Konfur laga xirto iyo marsiino ama saddesqayd iyo boqor oo gobollada Woqooyi iyo Soomaalida Galbeed laga xirto iyo gambo madaxa lagu xirto. Badanaaba gabdhaha miyigu madaxa wax kuma xirtaan. Timahay tidcadaan.

Haweenka Soomaalidu waxay kaloo qaadan jireen alaab xarrago o luqunta iyo gacmaa la gashado, waxaana ka mida: Hilqada dhegaa, jijimo, sindiyo iyo dugaagado o gacmaa la gashado. Intaa waxa raaca silsilado, muriyado iyo cabbaadho luqunta la gashado.

Reer magaalku wuxu xirtaa dhar badan oo kala jaada oo ay ka barteen dadka shisheeyaba ah. Dharkaa waxa ka mida: Macawis, cumaamad, shaati iyo surwaal oo raggo qaato iyo canbuur, googarad, masar, iyo garba-saar haweenko xirto.

## CUNTADA SOOMAALIDA

Cuntada Soomaalidu waxay u qaybsantaa saddex

1. Cuntada Reer Miyyiga:

Cuntada reer Miyyiga waxa ugu badan Caano, Hilib iyo Subag. Mosoggo, Galley iyo waxyaalo kaloo ay magaalada ka soo iibsadaan, oo ka midyihiin Sonkorta, Bariiska iyo Timmirta.

2. Cuntada Booraleyda:

Booraleydu waxay cunaan waxa u badan Mosoggo, Galley, Digir iyo waxyaalo ay magaalada ka soo iibsadaan oo sonkorta ugu badantahay.

3. Cuntada Reer Magaalka:

Cuntada Reer Miyyiga iyo tan Boorreydu mooyee, waxa kaloo Reer Magaalku cunaan bariis, baasto, bur iyo waxyaalo kaloo kala jaad ah.

CUNTADA SAMAYNTEEDA

Cuntadeeno waxay u badan tahay hilib iyo caano xoola laga helo. Waxa kaloo jira messego, iyo gelcey oo beeraha ka baxa. Cunto badan oo kala duwan baa laga sameeyaa messegeda iyo gellayda waxana ka mida:

1. Cambuulo(garow)
2. Carw-cad(xashir): waa markii buushaha laga saaro.
3. Soor ama Jiriir ama shuuro: waa marka la tumo ama la ridqo.
4. Furfur: waa marka la shiido. Waxana lagu kariyaa fuud. Ka dib waxa lagu daraa subag.
5. Laba-budo: waxa lagu kariyaa caano. Goortay bislaato yaa subag lagu daraa, dabkana laga yareeyaa. Subagga markay liqdo, yaa dhaalka lagu daboolaa dhoobana dusha lagaga malaasaa. Ka dib inta saabkii sii la geliyo yaa meel la soo suraa.
6. Canjeclo(cambaabur) iyo muufo.

Hilibka Soomaalidu cuntana waxa loo sameeyaa dhowr siyood oo ka kala duwan. Waxaana ka mid ah: Karis(falfal), hogays, boorimo, solay, shiiliin iyo kalaankal.

Waxaa kaloo hilibka laga sameeyaa oodkac(muqmad) oo ah hilib yaryar oo la googooyay oo inta la shiilay subag badan lagu daray oo lagu dhigay. Muddo fara badanna way oolli kartaa.

Caanaha xoolaha ama waa la dhanaa ama waa la lushaa oo subag baa laga la baxa. Caanaha geela ah: dhanista ayay ku wanaagsan yihiin, caanaha lo'da iyo kuwa arigana lulista ayay ku wanaagsan yihiin, maxa yeelay kuwa geela waa ka subag badan yihiin. Caanaha xooluhu guud ahaan waxay u kala baxaan, dhay, dhanaan, garoor, iyo ciir oo ah

Waxaa kaloo jira cano dhaydaq la yiraahdo oo laga yaqaan degmedaa Afmadow.Waxaana weeye caano markay garooraan ee fadhiistaan biyaha laga miiro; oo caano cusub lagu daro.

Dabadeed xeeraa lagu ridaa intaa sonkor lagu daro. Waa caano kayd gala oo muddo oolli kara.

## GUURKA SOOMAALIDA

Soomaalidu waxay isu guursataa laba siyood oo raacsan xeerka Islamka.Waxaana weeye:

1. Labada aabbe inay wada hadlaan oo isu doonaan labada ilmood.

2. Labada ilmood inay heshiiyaay oo iyagu ay dhamaystaan.

Labada aabbe amase labada reer markay heshiiyaan ayaa wiilka ama aabbihii bixiyaa xoola la yiraahdo gabbaati oo noqon kara mood iyo nool.

3. Labada qof markay is mehersadaan, gabarta waxa loo soo qaadaa oo ay inanka ku leedahay xoolo laga heshiiyay oo meher la yiraahdo. Waxaa kaloo jira, xoolo yarad la yiraahdo oo sida qaalibka ah geel, lò, ari, ama lacag ah oo gabarta reerkooda la siiyo. Reer magaalkuse xeerkaas intiisa badan hidda kuma dhaqmo.

## WAX KALA IIBSAD

Reer guuraaga, reer magaalka iyo beereeyda Soomaalidu waa dad aan kala maarmin oo si walba isugu xiran. Qolana qolada kale la'aanteed ma jiri karto. Waxayna kala iibsadaan oo isdhaafsadaan wixii alaab ah ama adduun ah ee ay haystaan. Inta badanna waxay ku kulmaan magaalooyinka.

Reer guuraagu wuxuu magaalooynka u iib geeyaa xoolaha nool, haragga, subagga iyo caanaha iyo waxyaallo kale. Waxayna kala qaataan dharka, cuntada iyo wixii kale ee ay u baahdaan.

Beerreyduna waxay magaalooyinka u iib geeyaan digaag(luki) iyo wixii beeraha uga baxa oo ay ka midyihiin meseggeda, gelleyda iyo sisinta. Waxayna ka qaataan dharka, sonkorta iyo wixii kale oo ay u baahdaan.

Reer magaalkuna wuxuu ku nool yahay wixii uga yimaadda beeraha iyo miyiga. Waxayna ka gadaan allaabta waddanka dibadda uga timaadda, iyo wixii magaalooyinka lagu sameeyo.

## GAADIIDKA SOOMAALIDA

Gaadiidka Soomaalidu waxa ka mid ah:

1. Geela, dameero, fardo iyo dibi oo miyiga lagaga dhaqmo. Gaadiidka miyiga waxa ugu badan geela.
2. Baabuurta oo ah gaaddiidka dhulka oo magaalooyinka, buraga iyo miyiga isaga socda. Aad bayna baabuurtu ugu badan tahay waddanka Soomaalida.
3. Dayuurado oo ah gaaddiidka cirka oo waddanka gudihiisa iyo dibaddiisaha isaga socda. Magaalooyinka ay aad u fariistaanna waxa ka mid ah Xamar, Kismaayo, Hargeeyso iyo Burao. Sharikadda Soomaalida ee Dayuuradaha oo ah laan madax bannaan oo dawladaha ka tirsan ayaana dayuuradaha u taliya.
4. Maraakiib iyo doonyo oo ah gaadiidka badda. Waxayna isaga socdaan dekedaha waddanka oo ka mid yihiin Xamar, Marka, Kismaayo, Boosaaso, iyo Berbera iyo kuwo kale oo dibadda ku yaal.

Dekedda Berbera waxa ka dhoofā waxa ugu badan geela iyo ariga, tan Markana muuska, tan Xamarna geela iyo lo'da, tan Kismaayana lo'da iyo muuska, tan Boosaasona beeyada iyo Kaluunka.

# DHAQANKEENNA DIINIGA AH

## DIINTA ISLAANKA

Diinta Islaanka waxay dhulka Soomaalida soo gashay sida la yiri qarnigii Koobaad (1) ee taariikhda Islaanka. Waxaanay ka soo gashay dhinacaas Waqooyi. Magaalooyinka Islaanka ugu soo horreeyey waxa ka mid ah: Saylac, Herer iyo Berbera iyo xeebaha u dhaxeeya. Markaas ka dib yaa Islaankii dhulkeenna Bari iyo Koofur ba aad ugu faafay. Dadka Soomaaliduna si wanaagsan bay diinta u qaateen uguna hoggaansameen markay kaseen. Si wanaagsanna dhulkay ugu fidiyeen. Sidaas daraaddeed Soomaalidu kulligeed waa Muslin.

Heerka diinta Islaankana bay aad u dhawraan, uguna dhaqmaan, uguna hanweynyihiin. Waxaanu u qabaa Soomaalinnimada tiirarkeeda ka ugu xoogga badan. Dhaqankiisa diiniga ahna wuu ku adag yahay.

## SIDA DIINTA LOOGU DHAQMO

**ARDAY:** Ilmuhu markuu yaryahay dugsiga la geeyo, quraankaana la bara akhriskiisa iyo dhigistiisa ba.

**XER:** Ardaygu markuu galin jabiyo (1) ka dib, xer buu noqdaa oo kutubtuu raacdaa. Wuxuu bartaa diintiisa wixii lagama maarmaan ah. In badan oo xerta ah yaa diinta dhab u barata iyo cilmiga iyo kasmadaba diintooda dhab ugu kasaan.

**WADAAD:** Wadaad waxa weeye qofka diinta iyo arrimaheeda aad ugu dadaala. Hawlaha wadaadka waxa ka mid ah:

1. Inuu ardada yaryar Quraanka iyo tiirarka Islaamka baro,
2. Iyo naagaha oo uu meheriyo marka la guursado,
3. Meelaha qaarkood ee aan Shiikh jooginna masaajiddaduu dadka ku tujiyaa kuna waxdiyaa.

**SHIIKH:** Waa qofka aad u yaqaan aqoonta diinta Islaamka. Wuxuuna aad ugu dadaalaa inuu diinta Islaamka faafiyo si ay dadka u dhaqdo oo ay u gartaan.

---

(1) wuxuu bilaabaa sida kutub loo raacdoo oo looxana lagu dhigo.

## IIDAHA DIINIGA AH:

Dadka Islaanka ah oo dhammi wuxuu leeyahay iido diinta ku saabsan oo ka dhexeeya, waxana ka mid ah:

1. **Iidda Soon-fur:** Waxa lagu magacaabaa Ciid-Al-Fitri. Waxana weeye markii soonka dhammaado. Dadka Soomaaliduna waxay ku dadaalaan maalintaas inay dhar fiican qaataan oo is qurxiyaan, dadka saboolka ahna cunto ka dhergiyaan. Subaxdaas waxa la tukadaa salaadda iidda waxana la bixiyaa sekada oogada. Qofkiina waxa laga bixiyaa laba suus oo kan Xamar ah oo meseggo ah ama galley ah ama wax kale ah.

2. **Iidda Arrafo:** Waxa weeye iidda labaad ee aad u weyn. Waxayna dhacdaa Xajka maalinta la guto dharaarta ka dambaysa. Subaxdaas salaad baa la tukadda sunne ah. Qoyskii ama ciddii heli kartaana waxay qashaa neef xoolo ah oo UD-xiyya la yiraahdo oo diinka Islaanku tilmaamay sida uu yahay.

Dadka Soomaalidu maalintaas dhar cusub buu xirtaa, gaar ahaan carruurta, aadna way u farxaan. Dadka saboolka ah nimba wuxuu siiyyaa wixi uu u heli karo maalintaas. Labadaas Iidood ee aan soo sheegnay, waa ugu waaweyn dadka Islaanka ah. Soomaaliduna si gaar ah bay u weyneysaa. Labadaas Iidood ba maalmaha u horreeya qaranka dhexdiisa hawlaha waa laga nastaa.

## XUSKA MAWLIIDKA NEBIGA

Waxa weeye xuskii dhalashada Nebi Muxammed(Nebed gelyo korkiisa ha ahaatee).Waana bisha Rabiic-Al-Awel laba iyo tobankeeda. Wadaaddaduna waxay aad uga sheekeeyaan Nebiga dhalashadiisii, tilmaantiisii iyo taariikhdiisii ba. Maalintaasna qaranka Soomaalida dhexdiisa hawlaha waa laga nastaa.

Dheelmiddii Nebiga: Soomaalidu waxa kalay u shirtaa xuskii habeenkii Nebiga loo dheelmiyay Masaajidka Madiina taniyo Baytul - Maqdas. Ka dibna loo dheelmiyay cirka sare.Wadaaddadu waxay aad uga faalloodaan sheekada ku saabsan Nebiga dheelmiddiisii.

Dago(Muxarram): Waxa weeye bishi Nebigu uu ka soo doolay Makka oo Madiina u soo guuray isaga iyo intii la socotay. Sidaas daraaddeed waxay noqotay bishi guga( sannadka) Islaanka ugu horreeysey. Maalintaas ugu horraysa bishaasna qaranka Soomaalida oo dhan dhexdiisa hawlaha waa laga nastaa.

Dadka Islaanka ah: Dadka Islaanka ahi wuxuu ku baahsanyahay adduunka oo dhan. Tiradoodana waxa lagu qiyaasay lix boqol oo malyuun oo qof. Qorammada Islaanka ah waxa ugu badan: Indooniisiya, Baagistaan, Naajeeriya, Carabta Midawdey, Sucuudiya iyo Soomaaliya. Inakuna waxaynu ku faani karnaa, inaynu boqolkiiba boqol muslin nahay.

## LAYLI GUUD (Qaybtii Labaad)

1. Hadalladan soo socda dhammays tir:

a) Aqalka reer miyyiga qaabkiisa sare wuxuu u egyahay.........................................

b) Mudulka hoos waxa lagaga dhisaa..............................................................

c) Xijiga waxa lagu guraa.............................................................................

d) Fandhaalka...........................................Killahaso.......................................

e) Aashuunka waa.................................haantu se waa...................................

2. Maxaa lagu falaa: a) Riqdinka iyo willaha?

b) Kalahha?

c) Jiimbaarta?

d) Weylaalista?

3. Sheeg laba wax oo: a) raggu xirto

b) dumarku xirto

c) Miyyiga aad looga cuno

d) Magaalada aad looga cuno

4. Hadalladan ku hor qor isku-talaab( X )
ama xarriiq godan (   ) had ba tii habboon:

a) Carow-Cadku waa gallayda ama meseggada markii buushaha laga saaro. (   )

b) Oodkaco waa galley qallalan. (   )

c) Caanaha lòda iyo kuwa adhiga waxa laysku yiraahdaa labeenley. (   )

d) Dhaydaqu waa caano lis ah. (   )

e) Gabarta marka la guursado waxa loogu ballan-qaadaa yarad. (   )

f) Reer magaalku wuxuu reer miyyiga iyo beerreyda ka iibiya isna kala gataa sonkorta.

g) Gaadiidka beeraha awrtaa u foolaad ah, kan baddana Doonnida. (   )

5. Hadallada xeraysan ereygii run ah hoos ka xarriiq:

a) Soomaalidu dhammanteed waa( Beerraley, Muslin, reer magaal).

b) Ardaygu marku qalin jebiyo wuxuu noqdaa( bare, wadaad, xer).

c) Wadaaddadu waxay af-Carbeerdka u bartaan inay( ku xoogsadaan, ku faanaan, Diinta ku kasaan).

d) Jidda soonfur sekada oogadu waa( laba suus, shan suus ah suus) oo kan Xamar ah.

e) Maalmaha iidaha qaranka dhexdiisa waxa laga nastaa( Cuntada, halaha, baabuurta).

f) Nebigu wuxuu dhashay laba iyo tobankii( Rabiic-Al-Awel, Arrafo, Soon-fur).

g) Dago waa bisha ugu( dambaysa, dhexaysaa, horraysa) sannadka Muslinka.

h) Nebiga waxa loo dheelmiyay( Masaajidka Madiina, Cirka, Baytul-Maqdas).

i) Tirada dadka Islaanka waxa lagu qiyaasay( lix boqol oo malyuun, laba malyuun,

## QAYBTI SADDEXAAD

## XOOLAHA IYO DHAQAALAHOODA

Dhaqashada Xoolaha:

Soomaalida badankeedu waa xoolaley, guud ahaanna dhaqaalaha xoolaha aad bay ugu badaashaa. Aqoon fiicanna waxay u leeyihiin sida xoolaha loo daajiyo,sida loo waraabiyo iyo sida loo naq-raaciyo ba. Weliba aad aqoon waxay ugu sii leeyihiin meelaha xoolaha u fiican iyo meelaha u xun, ceelka biyihiisu xoolaha u fiicanyahayna garasho dheer bay u leeyihiin.

Aqoon ballaaran waxay u sii leeyihiin haysimada xoolaha iyo xilligay awr qaataan, aalaaba idaha. Waxay kaloo aqoon u sii leeyihiin cudurrada xoolaha ku dhaca iyo sida looga daweeyo.

Xoolaha Soomaalida: Dab-Joog:

Xoolaha dalka Soomaalida ku nooli waxay u kala baxaan Dab-joog iyo Duur-joog. Dab-joog waxa la yiraahda xoolaha dadka weheshada oo aan ka cararin. Kuwaasoo ah: Geela,lòda, Ariga iyo Gammaanka( fardaha, baqlaha iyo dameeraha). In kastoo dhulka Soomaalida xooluhu ku badanyihiin, haddana waxay u sii badanyihiin meelaha daaqa ama biyuhu ku badanyihiin.

1. GEELA: Geelu foolaad buu u yahay xoolaha Soomaalidu haysato. Aad baanay u jeclyihiin oo dhaqaalihiisa ugu dadaalaan. Waxaanu dhulka ugu badanyahay meelaha daaqiisu ku wacanyahay ee xoobaha ka fog. Waxtar badan buu geelu Soomaalidu u leeyahay,

Geela laboodkiisa waa la rartaa: Aqalka; cuntada iyo wax alla wixii loo baahanyahay ba waa lagu rarta. Awrtuna xoog iyo awood bay u leedahay rarka iyo wax qaadista ba.

Dhaddigiisana waa la maalaa, Gugii iyo Dayrtii baanuu dhalaa. Sidkiisuna waa laba iyo toban bilood. Dhaddig iyo labood ba geela markii loo baahdo waa la qashaa, waana la iibsadaa. Xoolaha kalena waa ka qaalisanyahay. Biyahana in badan buu ka qadi-karaa, dhibahana adkaysin dheer buu u leeyahay.

2. LO'DA: Lòdu waa meesiga labaad ee xoolaha Soomaalidu dhaqato. Waxaanay ku badantahay meeshii biyo iyo caws leh; maxaa yeelay waa xoolo nugul oo aan biyaha maalin wax ka badan ka qadi karin. Lòdu waxtar weyn bay Soomaalidu u leedahay xagga hilibka, caanaha, subagga iyo xagga haragga ba. Xoolahana way ugu subag badantahay. Dibidana beerahaa lagu falaa. Lòdu waxay ku sii badantahây Gobolladaa Koofurta, maxaa wacay waa dhul caws iyo biyo badan ba leh. Inta badanna lòdu gugii bay dhashaa. Sidkeeduna waa sagaal bilood.

3. ARIGA: Arigu waa meesiga saddexaad ee xoolaha Soomaalidu dhaqato, xagga waxtarkana waa meesiga labaad. Ari waxa laysku yiraahdaa idaha iyo riyaha. Reer Soomaali ah oo miyyi deggani na ariga wax buu ka haystaa. Waxtarkiisuna waa badanyahay.

Arigu waa xoolaha haweenka iyo carruurtu ay ku noolyihiin. Iduhu waxay u badanyihiin meeshii dooxo ah iyo dhulka ciidda ah( Gobollada Waqooyi) ee cariska wanaagsan. Riyuhuna waxay u badanyihiin meesha buuraha ah iyo meeshii geed-calleemeedku ku badanyahay. Iduhu gugii iyo dayrtii bay dhalaan, riyahana xilli loo yaqaan ma leh. Sidka ariguna waa shan bilood.

4. GAMMAANKA: Gammaanku waa meesiga ugu yar haatan xoolaha Soomaalidu dhaqato. Farduhu waxay ugu badanyihiin Waqooyi. Waxaanay ku dhaqmaan meesha biyaha leh sida lòda.

XOOLAHA SOOMAALIDA: DUUR JOOG

Duur-Joog waxa la yiraahdaa xoolaha duurka ama debedda u hoyda, dadkana ka carara, Waxaanay u qaybsamaan: Dugaag iyo Ugaar.

1. DUGAAG: Dugaaggu waa bahalaha hilib-cunka ah. Waxa ka mid ah: Libaaxa, Waraabe (dhurwaa), Shabeel, Haramcad, Dacawo, iyo wixii la mid ah. Dhulka Soomaalidana dugaaggu waa ku badanyahay, meel kastana waa joogaan. Xoolaha iyo ugaartana way cunaan, cawskana way daaqaan. Biyahana way cabbaan. Libaaxu marku aad u baahdo dadkuu cunaa.

2. UGAAR: Dhulka Soomaalidu ugaarta hodan buu ka yahay, in kastoo dadkii ina gumaysan jirey aad u laayeen. Miyyigaas Eebbahay ballaarshey yay iskaga nooshahay oo meel walba kaga jirtaa kuna firirsantahay.

Ugaarta waxa ka mid ah: Biciid, Garanuug, Deero, Geri, Maroodi? cawl, Goodir, Gorayo, Gumburi iyo in kaloo fara-badan. Geriga iyo Maroodigu waxay ku noolyihiin labada webi (Shabeele iyo Jubbo) iyo inta u dhaxaysa. Gumburiguna(farow,dameer-dibadeed)wuxuu joogaa Nugaal. Waxa la filayaa in dhawaan wereeg wayn loo gooyaa sida dhulalka kale.

DAAQA DHULKA:

Dhulka Soomaalida daaqiisu waa wanaagsanyahay. Markuu barwaaqada yahay waxa ka baxa doog wanaagsan meel kastaba. Markay Jiilaalka tahayna wuxuu leeyahay caws. Waxa jira dhul kayn ah oo dhirtu ku badantahay iyo dhul bannaan ah. Waxa kaloo jira dhul oommane ah iyo dhul biyo leh. Markii roobku dào meel walba waxay leedahay biyo. Sidaas daraaddeed yaa reer guuraagu waxay degaan dhulka ugbaadka ah markay barwaaqada tahay, Jiilaalkiina dhulka ceelasha iyo Berkedaha leh.

a). Dhammaan dhulka Soomaalida xoolaha dhaqaalahooda waa ku wanaagsanyahay, waxa jira meelo yaryar oon dadka xoolaleyda degmadiisu u badnayn.

b) Dadka reer guuraaga ahi waa ka fogaadaan dhulka xeebaha u dow iyo webiga gaararkiisa ba. Waxaanay jecelyihiin meelaha ugbaadka ah, ama bacrinta ah.

c) Meel kastoo dhulka Soomaalida ka mid ahi bawaxay leedahay ciid, geedo iyo daaq iyada gaar u ah. Waxana la arkaa in meeliba si ku wanaagsantahay.

d) Dhulka Soomaalida waxa jira meelo buuro ah, sida Calaha oo kale; meelo dhulka Soomaalidu u badanyahay.

DHIBAHA REER GUURAAGA

Dhaqaalaynta xoolaha dhibo badan yaa Soomaalida ka haysata.

Waxaana ka mid ah, daaqa oo Jiilaalkii xumaada, biyaha oo yaraada iyo roobka oo ka raaga. Intaasoo dhammina waxay xoolaha u keentaa dhibo badan oo ey ka mid yahiin. Dhashooda oo yaranta, caanaha oo yaraada, xoolaha oo caatooba oo hilibkooda oo rummaada. Dhibaatada se ugu weyn waxay tahey iyadoo kolkol cudur galo ama ebaari dhacdo oo xooluhu aad u dhintaan.

CUDURRADA XOOLAHA

Waxa ka mid ah: Kud, Dhugato iyo Cadhudho oo geela ku dhaca; Sambab, Ag-mar iyo Daba-Ka-Ruub oo lo'da ku dhaca; Majooge iyo jibaax oo idaha ku dhaca; Sambab iyo Qanje oo riyaha ku dhaca. Waxa jira cudurro kale oo ka dhasha dulinka. Shilinta, Kudkudaha iyo wixii la mid ah.

KALLUUNKA DHULKA SOOMAALIDA

Dhulka Soomaalida waxa ku xeeran bad dhererkeedu dhowyahay , ha ahaato Bad-weynta Hindiya ama Bad-yarada Cadmeede. Bad-daasina waxay hodan ka tahay kalluun jaad walba leh. Waxa kaloo dhulka Soomaalidu leeyahay laba webi oo laga kalluumeysto. Waxaana weeye Webi Juuba iyo Shabeelle.

Kalluunku Soomaalida waxtar weyn buu u leeyahay xagga dhaqaalaha. Sannadku markuu ahaa 1966 waxtarka ay Soomaalidu badda ka heshay wuxuu noqday saddex malyuun oo shilin in ka badan. Iminkana intaa waa laga badinayaa.

JILLAABASHADA KALLUUNKA

Siyaalo badan bay Soomaalidu kalluunka u jillaabtaa ama u dabataa. Siduu dhaqanka Soomaalida ahaanjirey, Mallayga waxay ku jillaabtaan beden iyo huuri, shabaag iyo warmo-yayyar, Kallaab iyo lacaaf iyo alaab kaleetoo kala duduwan. Ugu, yaraan waxay badda ka kalluumaystaan gugii ba toddoba bilood.

Dawladaha kalluumaysiga addunka ugu horreeya waxa ka mid ah: Jabbaan, Shiina, xeebaha Ruushka iyo Kanada iyo Yurubta Galbeed.

XEEBAHA LAGA KALLUUMAYSTO

Dhammaan xeebaha Soomaalida waa laga jillaabtaa kalluunka. Waxase jira meelo xeebtaas gobolka Boosaaso ka mid ah oo ururro Talyaaniyah oo iskood u madax-bannaani kalluumaysiga u dhisteen. Meelahaas oo ah xaabo, Qandala iyo Boosaaso.

Wershed kale oo mallayga lagu hagaajiyo ayaa urur Soomaali ah oo madax-bannaani Kisimaayo ka dhisay. Wersheddaasina qayb weyn bay kalluumaysiga ka qaadataa. Waxa kaleetto jira Wershed uu Taliska Soomaalidu dhisay intii gobannimada la qaatay ka dib, isagoo la kaashanaya dawladda Ruushka. Waxaanay ka dhistay Laas-Qorayoo gobolkaa Waqooyi Bari ah. Wershaddaas waxa ka xoojiyya laba boqol iyo konton qof. Kalluumaysato badanina, wersheddaasa ka iibiyaan waxay soo jillaabtaan. Wershed kaloo kalluunka lagu engejiyo ayuu Maraykanku ka dhisay Boolimoog oo Xeebtaas Calawlà ah. Hase yeesho e dhibo badan oo ka horyimid daraaddeed yaan wersheddaas hadda hawli ugu socon.

KAALMAYNTA KALLUUMAYSATADA

Taliska Soomaalidu kalluumaysatada aad buu u kaalmeeye, una geesinimo geliyaa had iyo jeer. Wuxuuna Talisku Xamar ka dhisay dugsi kalluumaysiga iyo badda maristeed ba laga barto. Dugsigaasina Soomaalida waxtar weyn buu u leeyahay. Waxa kaloo jira xafiis gaar ah oo Xamar ku yaal oo kalluunka hawlihiisa laga maamulo.

Soomaalidu wagga kalluuumaysiga xiriir bay la leedahay ururrada adduunka ee ku bahoobay kalluumaysiga. Waxaanay had iyo jeer ku dadaashaa inay hore u mariso oo ay kor u qaaddo habka kalluumaysiga badaha Soomaalida iyo sida wax looga dheefo. Si wanaagsanna waxay Soomaalidu u dhawrtaa xeerka uu yaal biyaha badaha iyo kalluumaysiga.

## TAYLI GUUD ( Qaybtii Saddexaad)

1. Hadalladan wax ka dhoh:

a) Soomaalidu siday xoolaha u dhaqaalaysataa?

b) Xoolaha dalkeena guud ahaan labadee u qaybsamaan?

c) Xoolaha jaadkee biyaha in badan ka qatanaan kara?

d) Meesiga reer kasta oo miyyi deggani wax ka haystaa waa kee?

e) Maxaad ka taqaan: ( a ) Dugagga ?

( b) Ugaarata ?

2. Hadalladan soo socda siday isu leeyihiin isugu toosi:

a) Dhulku marku barwaaqada yahay: Ceelasha iyo berkedaha dushooda.

b) Reer guuraagu Jiilaalkii waxay degaan: waxa ka baxa doog.

c) Dhulka kastaa waxay leedahay: way caatoobaan hilibkooduna wuu yaraadaa.

d) Abaartii xoolahu: ciid geedo iyo daaq u gaar ah.

3. Hadalladan dhammaystir:

1. Badda dhulkeenna waxa laga helaa kalluun aan..................................

.........................................................................

2. Kalluunka waxa lagu jillaabtaa..........................................

.........................................................................

3. Kismaayo waxa ku taal.................................................

4. Xamar waxa laga dhisay.................................................

.........................................................................

5. Soomaalidu kalluunmaysiga xiriir bay la leedahay...........................

.........................................................................

## QAYBTI AFRAAD

## BEERAHA SOOMAALIDA

BEERAHA:

Dhowaan ka hor Soomaalidu beeraha u may jirin. Waxaa yeelay dalka badidiisu wuxuu ahaa reer guuraa xoolo dhaqato ah. Ha ahaato ee guud ahaan dhulka Soomaalida beeraha aad buu ugu fiicanyahay; biyo roob ama biyo webi mid kastaba ha ku waraabo e. Gobollada beeraha u badanna waxa ka mid ah: Banaadir, Labada webi iyo inta u dhaxaysa, iyo gobolka Waqooyi Galbeed.

DHULKA BEERTA KU FIICAN:

Dhulka beerta wuxuu ugu fiicnaadaa siyaalo badan oo kala duwan:

1. Biyaha Webiga inuu ku waraabo:

Gobol weyn oo dhulka la beero ah yaa ku waraaba ama ku waraabi kara biyaha webiyaalka Shabeelle iyo Jubba. Dhulkaas waxa loo beeraa habka cusub ee aqoonta beerista. Waxana lagu beera mikiinadaha cusub. T Taasina waa wuxuu dhulku beerta ugu fiicnaado. Hase ahaato e ceebta webiyaashu waxay tahay inay marna aad u buuxsamaan oo faafaan beerahana wax yeelaan, marna guraan sida Shabeelle oo kale ama biyo yaraadaan sida Jubba oo kale. Webiyaashu waxay biyo keenaan bisha APRIL dabayaa-qadeeda; inyar inyar way u kordhaan biyahoodu. Xilliga dayreed bisha DECEMBER yaa biyuhu aad u faafaan. JANUARY, FEBRUARY iyo MARCH biyaha Shabeelle way go'aan, Jubbana wuu biyo yaraadaa.

Dhulka labada webi warrabin karaan ee beerta u suubban waxa lagu maleeyay siddeed malyuun oo hiktar. Inta la beeraase haddan waa yartahay. Webiyaashu waxay warrabiyaan Hiiraan Banaadir iyo labda Jubbo barkood.

2. Biyaha Roobka inuu ku waraabo:

Goballada beertooda biyaha roobku waraabiyan waxa ka mid ah in badan oo Jubbada kore ah iyo Mudugta hoose iyo Waqooyi Galbeed. Dhulkaasna waxa ka baxa mesego, digir iyo gelley.

Gololka Waqooyi Bari iyo Loosaaso, in kastoo dhul beer ku fiican ay leeyihiin, durdurrana leeyihiin, haddana lama beerta. Waxa se ka baxa caw, xiji oo geedaha beeyyada iyo maydiga laga guro ah iyo xabko badan oo kala duwan. Xeebaha Calawla na timir baa ka baxda.

CARRADA BEERAHA KU FIICAN

Dhulka Soomaalida badankiisu beerta waa u suubbadaa. Waana ugub. Labada webi dhulka u dhaxeeya waxa weeye carra-madow culays iyo fudayd ba leh, beertana ku fiican. Dhulka Soomaalida waxa kaluu leeyahay carro-cad iyo carro-cas. Sidaas daraaddeed waxyaalo badan oo kala duwan baa ka bixi kara.

BEERTA WAXA KA BAXA:

Beeraha waxa ka baxa waxaa ka mid ah:-

1. MESEGGO

Meseggadu waxay ku baxdaa roobka iyo waraabka webiga. Waxay ka baxdaa Jubbada sare, Hiiraan iyo Gobolka Waqooyi Galbeed. Waxay kaloo aad uga baxdaa dhulka Soomaalida Galbeed iyo meeshii carro-madow fudud leh. Gobolka Koonfur laba xilli bay baxdaa sannadkii ba. Gobalka Waqooyi se xilli keliya bay ka baxdaa gù kasta.

2. GALLEY

Galleydu badiba waxay ka baxdaa labada webi(Jubba iyo Shabeelle) iyo inta u dhaxaysa, gugii kasta ba laba jeer. Waxaanay ka baxdaa dhulka carro-madowdà culus leh. Waxay ku baxdaa roobka iyo biyaha webigá labadaba.

3. DIGIR

Digirtu iyadoo kala duwan, dhulka Soomaalida siduu u badanyahay ba way ka baxdaa, badiba dhulka carra-madowda ha ugu fiicnaato e. Waxay kaloo ka baxdaa dhulka carra-caska ah iyo carra-cadka. Dayrtii iyo Gugii ba way baxdaa, biyaha roobka iyo kuwa webiga labda ba way ku baxdaa.

4. SISIN

Sisintu waxay ka baxdaa webiyaasha agagaarkooda, gaar ahaan gobolka Koonfur. Xilliga Dayreed keliya bayna baxdaa. Sisinta waxa laha miiraa saliidda cuntada lagu darsado tan ugu fiican. Laba siyaalood baana loo miiraa; Mar xoolahaa wereejiya marna Makiinad.

Lawska, Qumbaha iyo Qurdhada cudbiga na waa laga miiraa saliidda.

5. MUUS

Muusku wuxuu ka baxaa dhulka webiyaashu waraabshaan, gaar ahaan dhoobey inteeda badan oo ku waraaba shabeelle iyo Gol oo ku waraabta Ganaane (Jubba). Muusku wuxuu ka midyahay waxyaalaha Beeraha dhulkeena ka baxaa oo debedda loo iib geeyo wàxa ugu badan.

6. KIINJE( Aala-Sokor)

Kiinjaha waxa laga beeraa Jawhar, waxana beerta urur iskii u madax bannaan o dawladda Soomaalida ka tirsan.Dabeedna weshod Jawhar ka dhisan yaa

BAAHIDA BEERAHA

Beeraha waxa ka baxa in la kordhiyo waxa loogu baahanyahay:

1. Baahida loo qabo cunno ku filan dadka Soomaalida in la helo si:

   a) Aynnu uga maaranno cuntada debedda la keeno.

   b) looga deeqtoomo kaalmaha shisheeyaha.

   c) looga gaashaanto abaaraha iyo wax yeelladooda.

Weliba waa in la badiyo meseggada, gelleyda, digirta iyo sisinta oo aad loo cuno.

2. In si fiican oo jaban loo gaarsiiyo dadka qaranka oo dhan, gaar ahaan gobollada aan beeraha lahayn.

WAXA DIBADDA LOO DHOOFIYO

Soomaalidu waxay dibadda u dhoofiso waqtigan waxa u badan xoolaha nool oo ay ka mid yihiin:-

geela, lò'da, ariga iyo haragoodaba. Waxaana loo dhofiyaa waddanno badan oo ku yaal Yurub, dhulka Carabta iyo aduunka kale.

Waxa kaloo dibadda loo dhoofiyaa wixii beeraha ka baxa oo uu ka mid yahay muusku. Waxaana la filayaa sannadaha soo socda in waxa beeraha ka baxaa ugu bataan waxa Soomaalidu dibadda u dhoofiso.

GAADIIDKA IYO BEERTA

Gaadiidka iyo beerta waxa ka baxa, xiriir xooglah baa u dhaxeeya. Waxa beerta ka baxaa ma gaari karaan gobollada aan beerta lahayn haddan gaadiid la helin. Gaadiid fiicanna lama heli karo haddan waddooyin wanaagsan la heli, Kolkii ay waddadu xumaato ba waxa beerta ka baxaa waxay dhulalka kale ku gaaraan iib sare. Sidaas daraaddeed waxa loo baahanyahay in la helo waddooyin badan oo fiican oo doog iyo diraac ba gaadiidku mari karo.

DHIBAAHA BEERAHA

Dhibaattoyinka beeraha ka horyimaadda waxa ugu badan:

a) Carrada oo laba waxyaalood ku xumaata:

   (i) Carrada oo seelowda(cusbawda). Badina waxa keena Webiyaalka, Togagga iyo laagaha oo biyohoodu cusbo wataan.

   (ii) Dhulka oo ku jilca beeritaanka badan oo ka yareeya nuxrurka beertu ku baxdo, hase ahaato e sidaan hore u soo aqoegnay dhulka Soomaalidu badankiisu waa ugub beerta ku fiican.

   In kastoo yartahay waxa ka baxaa darabkii, ugu wacan waxyaalahan soo socda:-

1. Beerta oo aan loo falan si aqoon iyo farsamo ah.
2. Beerreydeenna badideeda oo aan haysan alaabta cusub ee beerta lagu qodo, iyo iyagoon si fiican loo tilmaamin loona taba-barin.
3. Sida aynu beerta u falano ama u qudanno oo habkii hore ah.
4. Dhulkoo aan lagu shubin waxa xoojiya, sida digada oo kale ama wixii la mid ah.
5. Beerta oon guud shaan si fiican looga murgi-jirin hadda ka hor.

b) Beerta oo jirrata ama dixri ku dhasho.

c) Xoolahoo daaqo ama ayyaxoo cuna. Waxase loo baahanyahay beerta oo lagala dagaallamo wixii wax-yeelleya oo idil.

d) Webiyaalka oo Faafa:

Dhibaha waaweyn oo mararka qaarkood dhaca waxa ugu daran webiyaalka oo beeraha ku faafa. Taasina waxay ka dhalataa webiyaalkeenna oon biyohoodu gacan inoogu jirin si markii la doonana loo kaydsado markii la doonana wax logu waraabsado. Sidaas daraddeed waxa loo baahanyahay in webiyaalka la xiro, biyohoodana lagu shubo harroyin waaweyn oo lagu kaydiyo; si beerta dhulkeenna waraabkeedu uu uunoqdo mid taxan oo joogto ah, xilli walbana la beeri karo.

## HORU-MARINTA BEERAHA

Beeruhu waa xubinta labaad ee dhaqaalaha waddankeenna. Sidaad u ogtahay xubinta koobaadna waa xoolaha iyo wixii ka soo baxa.

Waagii hore dhul yar baa la beeri jiray. Sidaa daraddeed waxa yaraaday wixii dhulka ka soo baxaayay. Waxaana khasab innagu noqday inaan dibadda cunto ka soo gadanno.

Haddase, markii Towraddii 21 Octobar dhalatay waxaa lagama maarmaan noqotay in la kordhiyo dalka waxa ka baxa , Waxaana la bilaabay in beero waweyn la sameeyo oo " Iska wax u qabso " lagaga shaqeeyo. Beerahaasna waxa lagu talo galay in laga sameeyo:-

1. Shalaambood iyo Jannale oo degmeda Marka ah,
2. Moordiinlle oo degmeda Afgooya ah,
3. Jawhar,
4. Beledweyne,

5. Toqwajaale oo degmoda Gebiley ah, iyo meelo kale oo fara badan.
Waxa kaloo Towraddu ku dhawaaqday in la dhiirriyo dadka beera-leyda ah oo laa siiyo:-

1. Lacag ay Baananka ka deyntaan,
2. Abuur wanaagsan,
3. Makiinadaha beeraha lagu qodo,
4. Dad aqoon u leh cilmiga beeraha oo bara sida wanaagsan ee beeraha looga shaqeeyo,
5. Iyo dawladda oo iibsata waxa beeraha ka baxa.

LAYLI GUUD ( Qaybtii Afraad)

1. Hadalladan soo socda wax ka dhoh:

a) Siyaalaha dhulku beerta ugu fiicnaado wax ka sheeg?

b) Webiyaashu goormay dhib keenaan?

c) Labada gobolee aan weli wax laga beerin sheeg?

d) Carrada beerta ku fiican sheeg?

e) Sannadkii meeqa jeer bay baxdaa; xaggay se ka baxdaa:

a) Mesegadu? b) Gallaydu ? c) Sisintu?

f) Waxa beeraha ka baxa ee debedda loo dhoofiyo waxaa ugu badan?

g) Aala-Sokorku waa maxay? Xaggeese lagu hagaajiyaa?

2. Hadalladan ku hor qor " Run", " Been" ama "ma aqaan".

a) Si aynuu uga deeqtoonno kaalmaha shisheeyaha waxaynnu u baahannay in beeraga laga shaqeeyo.

b) Waxa debedda loo dhoofiyo waqtigan waxa ugu badan muuska waxana ku xiga xoolaha nool.

c) Beerta iyo Gadiidka xiriir kama dhaxayn-karo.

d) Carradu markay siglowdu beerta dhib bay u geysataa.

3. Hadalladan soo socda hagaaji:

a) Waxa loo baahanyahay in webiyada biyahooda la xiro si loogu dabbaasho.

b) Beertu waxay fiiro dheer u leedahay hore u marinta Taliska Tawradda.

c) Beraleydu lacag bay amaahisaa Baanka.

d) Kelliyo iyo faro dhaadheer ayaa beeraha loo jeexaa si aanay waraab u helin.

## Qaybti Shanaad

## DADKA IYO QARANKIISA

Qof kasta oo Soomaali ah waxaa jira wax xaq qarantu ugu leeyahay waxaana ka mid ah:

1. Inuu dalkiis cadawga ka ilaaliyo oo ka celiyo,
2. Inuu xeerka dalkiisa ilaaliyo oo u hoggaansamo,
3. Inuu xooggiisa iyo xoolihiisa u huro dalkiis, si dhaqaalaha dalkiisu sare u kaco,
4. Inuu dhawro xaqa iyo dawga uu ku leeyahay qof kasta oo kale iyo dadweynuhuba.
5. Inuu la dagaallamo qabyaaladda, eexashadah musuqmaasuqa iyo wixii kalee la mid ah ba. Sidaas oo kale ayaa qof kastaba waxa uu qaranka xoq ugu leeyahay waxa ka mid ah:

1. In qaranku caafimaadkiisa ka shaqeeyo si uu u helo daawo, iyo meelaha wax lagu daaweeyo.
2. In qaranku tacliintiisa ka shaqeeyo si uu u helo dugsiyo uu wax ku barto.
3. Inuu naftiisa iyo maalkiisa nabad gelyo u helo. Hasa ahaatee, qofna keligii wax ma qabankaro haddaanu gacan ka lehin dadka kale, sida Soomaaliduba ugu maahmaahdo " far keliyah fool ma dhaqdo". Marka waxa loo baahanyahay in dadku isu tago oo xooggiisa isu geeyo oo iskaa wax u qabso lagu wada shaqeeyo. Dhallinyarada Soomaalida gaar ahaan waxa laga doonayaa inay ka qayb galaan mashaariicda horu-marka ad ee waddanka laga qabanaayo, ama beero ha ahaadeen ama dhismo kale ha ahaadeene. Dugsiyo, cusbataallo, waddoyin, xafiisyo iyo beero badan ayaa lagu dhameeyay hawlaha iska wax u qabso. Dhalinyaradu aduunkoo dhan waa mesha jidhka u ah " halbowlaa". Ururka dhalinyaradu waa xoog gaar ah oo wakhtigii la doonaba wax wayn qaban kara.

## SOOMAALIYA IYO DALALKA KALE

Sida la ogyahay Soomaaliya waa dal Afrikada Bari ka mid ah oo ku magac-dheer "Geeska Afrika". Haddii aynu jaangooyada dalalka Afrikada Bari eegno, waxaan arkaynnaa dalalka Soomaaliya u dhow ah, ama ay isku xiilliga yihiin. Kuwaas oo ah: Kiiniya, Itoobiya, Soodaan, iyo Ugaandha. Waxa loola jeedaa xilligoodu kulayl buu u badanyahay, maxaa yeelay dalalkaasoo dhammi waxa u wada dhowyihiin xariiqda dhulka barta. Dalalkaas roobku wuxuu ka da'aa guga iyo dayrta. Hase ahaato e waa sii kala kulayl iyo roob badanyihiin.

Dhulalkaas aynu magacawnay, waxa dagmo inoogu xiga ama inoo eg, haddii dadka iyo dhaqanka ba la eego, Itoobiya.

### ITOOBIYA

Itoobiya waa dal ( Tooxdiisu ) dhaafdiisantahay hal malyuun oo Km. oo affar-gees ah, dadkiisuna yahay 20,000,000 oo qof. Waa boqortooyyo dhaxal ah.

Magaala madax-dooduna waa Addis-Ababa. Dhaqaalcheedu wuxuu ku tiirsanyahay beeraha iyo xoolaha dhaqashadooda. Dhulka hoostiisana waxa laga helaa macdan, uu ka midyahay dahabku.

Soomaaliya iyo Itoobiya, derisnimada ka sokow, waxay ku wada jiraan Midawga Afrika. Hase ahaatee, xiriirkoodu ma fiicna. Taasoo ay keentay Itoobiya oo gumaysata dalka Soomaalida Galbeed oo ay xoogga ku soo gashay. Taasoo uu gacan ku siiyey gumeystaha Ingriis.

1949 yaa Ummadaha Midoobey goosteen in Eretria la raaciyo Itoobiya, xiriirkooduna ahaado(federale). Laakiin 1963 yuu Boqorka Itoobiya ku darsaday Eretria taliskiisa. Dadka reer Eretria badankiina ma raacsana midowga Itoobiya ka dhexeeya, oo waxay jeeclyihiin inay ka goostaan xukunka. Asmara waa magaala madaxdeeda, dadkuna waa hal malyuun iyo bar qof una badan Mulsin. Dhaqaalcheedu sida Itoobiya wuxuu ku tiirsanyahay beeraha iyo xoolaha, Waxa raaca xeebaha oo laga jillaabto.

KIINIYA

Kiiniya, in kasto aan deris nahay, waxay gumaysataa gobol dalka Soomaalida ka mid ah oo la yiraahdo N.F.D.; Ingiriiskuna gacan ku siiyey isagoo aan tax-gelin aayaha dadkeeda. Taasoo abuurtay is-af-garansha-waaga ka dhexeeyya Soomalida iyo Kiiniya. Hase ahaato e, xiriir wax kala iibsad ah yaa innaga dhexeeya.

Kiiniya inkastoo ay Soomaalida isu dhowyihiin, misna waa ka qabawdahay. Maxaa yeelay waa dhul sarreeya oo leh qarar dhaadheer sida Kelimanjaaro. Iyadaana inaga roob badan, Dadka badankii waa beerrey iyo inyar oo xoolo dhaqato ah. Waxay debedda u dhoofisaa bun, kaakow, muus, shaah, iyo hargo. Nayrobi waa magaalo madaxda, Bombaasana waa furdaddeeda weyn.

SOODAAN

Soodaan waa dal u dhexeeya Jamhuuriyadda Carabta Midowday iyo Itoobiya, waana dalka u ballaaran Afrika dhul ahaan. Dadku waa saddeh iyo toban malyuun. Waa dad Muslin u badan oo xiriir weyn inaga dhexeeya. Xiriir dhaqaale, Heshiis wax-barasho iyo Jaalnimo ayaa innaga dhexeysa. Dhulku waa dooxooyin uu marc webiga Niil. Dadkuna waa xoolaley(Koofur) iyo beeraley ( Waqooyi). Magaalo madaxdu waa Khartuum. Waxay debedda u doofiyaan:Cudbi, xabag-carbeed, xoolo iyo sisin.

Waxa jira dalal kaloo Afrikaan ah iyo kuwo kalaan Afrika ku ool oo Soomaalidu xiriir wax kala iibsadah iyo jaalnimo la leedahay. Dalalkaas waxa ka mid ah:Jamhuuriyadda Carabta Midowday, Yamanta Koofureed, Shiinaha, Hindiya iyo Ruushka. Dalalkaas waxaan ka qaadannaa waxyaalahaan Soomaaliya laga helin oo ka mid ah: Bun, dawo, baabuur iyo alaabteed iyo waxayaalo kaloo fara-badan oo aan dhulkeenna ka bixin, sida bunka oo Itoobiya innoga yimaadda; shaaha oo Hindiya iyo Shiinaha inooga yimaadda. Soomaalidu waxay debedda u saartaa muus( Itaaliya), xoolo nool iyo hargo(Sacuudi Carrebiya) beeyyo oo [illegible] Itaaliya)

## DHULKA IYO AFARTIISA GEES



Dhulku wuxuu ka koobanyahay dabayl iyo ciid iyo dhagxan; waana kubbad qaabkeed oo kale. Waxanuu u qaysanyahay dhul biyo hel iyo dhul qallallan. Inta biyaha leh baa ka badan inta engegan. Carro edeg dhammaanteed inta engegani waxay u qaybsantaa shan dhul( qaarraddod). Kuwaasoo ah: Afrika, Aasiya, Orobba, Ostraaliya iyo Ameerika. Kuwaasoo u qaybsama meelo bannaan; meelo buuro ah, meelo boholo ah iyo meelo baraf fadhiyo. Dadka aqoonta dheer dhulka u lihi waxay yiraahdeen dhulku.

Subaxdii haddii aad u joosato meeshay qorraxdu ka soo baxdo aad labadaada gacmood fidiso, meesha hortaada ku beegan waxa la yiraahdaa Bari( qoorax ka-soo-bax). Meesha dhabarkaaga ku beeganna waxa la yiraahdaa Galbeed( bogox ama qorraxsin).Meesha gacantaada bidix ku beeganna waxa la yiraahdaa Waqooyi. Meesha gacantaada midig ku beeganna waxa la yiraahdaa Qoofur. Intaas aan soo sheegnay wax laysku yiraahdaa " Affarta gees".

<u>QORRAXDA IYO DHULKA</u>

Qorraxdu waa xiddig dhulka ka fog, inkastoo ay xiddigaha kale inooga dhawdahay. Qorraxdu dhulka waxay ka weyntahay, kun-kun oo goor iyo saddex boqol oo goor.Sidaas daraaddeed ayaa dadka aqoonta dheer meerayaasha(felegga) u lihi waxay yiraahdeen dhulku qorraxda wuxuu ku soo wareegaa gugiiba( sannadkiiba) mar.Taasoo ay ku dhashaan afarta xilli. Bal xusuuso magacyadoodii.

Waxa kaloo jirta in dhulku 24 saacadoodba mar wareega. Taasina ay dhaliso habeenka iyo maalinta.

DHULKA IYO SAHANKA CIRKA

Dalalka aynu soo magacawnay qarkood waxa naga dhexeeya heshiis ku saabsan hor-u-marinta dalka sida Midowga Soofeetika oo dhisay Warshadda Kalluunka oo Laas-Qoray; ta hilibka ee Kismaayo; tan caanaha ee Xamar ku taal iyo dekedda Berbera iyo waxyaalo kale. Shiinaha oo dhisay golaha murtida iyo madaddaalada oo Xamar, haatanna tijaab beereed gacanta ku haysa. Waxay kaloo Shiina dhisaysaa warshad Buuri iyo Taraq iyo waddo laba kun oo Km. ah, oo isku xiririirisa Koofur iyo Waqooyi.

LAYLI GUUD ( Qaybtii Shanaad)

1. Hadalladan wax ka dheh:

a) Qoranku muxuu qof kasta ka rabaa?

b) Waxa Taliska Soomaaliyeed dadkiisa u taray wax ka sheeg?

c) Calankeenna tilmaan?

2. Hadalladan dhammaystir:

a) Dadka dhulka Soomaalida u soo doola Carabtaa..............................

b) Sannadku markuu ahaa..............yay Carabtu xeebaha Waqooyi soo degtey;.. .....................waxay ka mid noqotay..............................ee Talyaani kor ka ilaalineyey.

c) In kastoo..........................dhulkeenna aad u joogaan,haddana Soomaalida isma dhex galaan mana kala guursadaan.

d) Dhulka Soomaalida waxa Talyaani laga cryey......................waxsuu ku soo noqday............................

3. Hadalladan soo socda wax ka dheh:

1. Derisyadeenna dalkee inoogu xiga degmo dad ahaanna inoogu eg?

2. Sheeg magaalo madaxda: a) Itoobiya, b) Kiiniya, c) Suuddaan.

3. Eretria xaggay raacsantahay ? Goormaase la raaciyey?

4. Kiiniya maxay dhoofisaa?

5. Suuddaan maxa inaga dhexeeyya?

6. Carro edeg dhulka engegani meequ u qaybsamaa?

7. Magacawo afarta jaho?

8. Qorraxda iyo dhulka kee weyn? Meeqayse kala weynyihiin?

9. Dhulku meeqa jeer buu: a) qorraxda ku soo wareegaa? b) wareeg sameeyaa?

10. a) Sahanka cirka adduunka yaa ugu horreeyey?

b) Dadka dayyaxa tegey sheeg?

c) Maxay ku tegeen dayyaxa?

4. Hadalladan soo socda ku hor qor " Ruun", "Been" ama " ma aqaan".

a) Soomaalidu isku midab ma aha.

b) Reer guuraaga barwaaqadaa u talisa.

c) Reer guuraaga, beeraleyda iyo reer magaalkuba way isu tal-tallaabaan.

d) Gobollada dalkeena Boosaaso uga dad badan, Benaadir banna ugu dad yar.

e) Xoolaha, kalluunka iyo beeruhu ba waxay ku noolyihiin dadka.

TUSMADA BUUGA

BAL : QAYBTA KOWAAD.

1. Soomaaliweyn (Dad iyo Dal)
2. Gobollada iyo Degmooyinka
3. Dawlada Towrada
4. Dhulka Abuurtiisa
5. Hawada
6. Xilliyada
7. Is Dhaxgalka Dadka
8. Nolosha Dadka Soomaaliyeed
9. Layli Guud Q.I.

QAYBTA LABAAD

10. Dhaqanka Soomaalida. (Dhiska Aqalada)
11. Alaabta Samayntooda
12. Adeega Guriga
13. Dharka Dadka
14. Cuntada Soomaalida
15. Cuntada Samayntooda
16. Guuriga Soomaalida + Wax kaca iibsad.
17. Gadiidka Soomaalida
18. Dhaqanka Diiniga ah. (Diinta Islaanka)
19. Sida Diinta loogu Dhaqmo
20. Iidaha Diiniga ah.
21. Xuska Mawliidka Nebiga
22. Layli Guud Q. 2

QAYBTA SADDEXAAD

23/24 Xoolaha iyo Dhaqaalahooda
25. Xoolaha Soomaalida. (Duuk Joog)
26. Dhobaha Reer Guuraaga
27. Xoobaha Laga Kalluumaysto
28. Layli Guud Q.3
29. QAYBTA AFRAAD. (BEERAHA)
30. Carrada Booraha Fiican
31/32/33. Baahida Beeraha
34. Layli Guud Q.4

QAYBTA SHANAAD

35. Dadka iyo QaranKiisa
36/37 Soomaaliya iyo Dalalka Kale
38 Dhulka iyo Afartiisa Gees
39. Qoraxda iyo Dhulka